

Ogeysiiska Dadweynaha ee Xuquuqda ku hoos jirta Title VI

OGAYSIIS KU SOCDA DADWEYNAHA: XUQUUQDAADA SIDA UU QABO TITLE VI EE XEERKA XUQUUQDA RAYIDKA Tri-CAP

Tri-CAP waxaa ka go'an in ay hubiso in aan qofna laga saarin ka qaybgalka, aan loo diidin nacfiyada, ama haddii kale lagu samaynin takoor ku salaysan isir, midab, ama asal qaran barnaamij kasta ama hawl kasta oo qaadata kaalmada maaliyadeed ee Federaalka iyada oo aan loo eegin in mashaariic cayiman ama adeegyo ay federaalku maalgeliso. Barnaamijyada gaadiidka iyo adeegyada waxaa loo qaybiyaa si waafaqsan Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga iyo maamulada takoor la'aanta ee la xiriira. Intaa waxaa dheer, Tri-CAP waxaa ka go'an inay hubiso in barnaamijyadeeda ay ku soo daraan marin u helid loogu talagalay dadka aqoontooda Ingiriisigu ay xaddidantahay.

Qof kasta oo aaminsan in iyaga, shaqsi ahaan, ama xubin kasta oo ka mid ah dabaqad gaar ah oo dad ah, lagu sameeyay takoor ku salaysan jinsi, midab, asal qaran ayaa waxay ka xarayn karaan cabasho takoor Tri-CAP isagoo isticmaalaya foomka cabashada ee ku yaalla websaydka Tri-CAP. Foomka cabashada iyo habraacyada ayaa sidoo kale lagu heli karaa iyaga oo ah nuqul adag oo ku qoran, Isbaanish, Soomaali, iyo luqado dheeraad ah marka la codsado. Websaydka Tri-CAP waa: <http://www.tricap.org>

Cabashooyinka waxaa si toos ah loogu soo gudbin karaa Tri-CAP iyo/ama Waaxda Minnesota ee Gaadiidka (MnDOT), Xafiiska Xuquuqda Madaniga, MS 170, Fiiro gaar ah: Barnaamijka Title VI Program, 395 John Ireland Blvd, St. Paul, MN 55155

Haddii kale, cabashada waxaa si toos ah loogu soo diri karaa Federal Transit Administration (Maamulka Gaadiidka Federaalka) iyadoo cabasho laga xaraynayo Xafiiska Xuquuqda Madaniga, Attention: Title VI Program Coordinator, East Building, 5th Floor-TCR, 1200 New Jersey Ave., SE, Washington, DC 20590

Haddii aad u baahantahay macluumaad lagu turjumay luqad kale, ama aad u baahantahay macluumaad qaab kale ah, fadlan la soo xiriir Agaasimaha Qorshaynta iyo Qiimaynta, Tri-CAP 1210 23rd Avenue North, Waite Park, MN 56387, General@tricap.org

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Barnaamijka Tri-CAP, Title VI, iyo hababka loo gudbiyo cabashada, fadlan ka tixraac Qorshaha Caawimada Luuqada, iyo Lifaaqa H: Habka Cabashada Title VI ee ku yaalla websaydka Tri-CAP, oo ku hoos jirta qaybta How to Ride (Sida Gaadiidka loo Raaco) ee kore | Tri-CAP (tricap.org) telefoonka 320-251-1612; email u dir General@tricap.org ama soo booqo xafiiskeena maamulka ee ku yaalla 1210 23rd Avenue South, Waite Park, MN, 56387.

[signature]
Lori Schultz,
Agaasimaha Fulinta
Tri-CAP

10-12-22 [handwritten]
Taariikhda

Habka Adeecidda Title VI (Title VI Compliant Procedure)

Tri-CAP waxaa ka go'an inay hubiso in aan qofna laga saarin ka qaybgalka, loona diidin dheefaha, ama haddii kale loo geysto takoor ku salaysan isir, midab, ama asal qaran ee Tri-CAP, bixinta barnaamijyada iyo adeegyada gudaha Degmooyinka soo socda ee Benton, Mille Lacs, Morrison, Sherburne, iyo Stearns (oo halkaan looga yaqaano "Tri-CAP,") waxay xerayn karaan cabashada Title VI iyagoo buuxinaya soona diraya Foomka Cabashada Cinwaanka VI ee Tri-CAP. Tri-CAP waxay ku baartaa cabashooyinka ay heshay mudo aan ka badnayn 180 maalmood kadib markii dhacdada eedeeynta keentay ay dhacday. Tri-CAP waxay ka shaqeyn doontaa cabashooyinka la dhamaystiray.

Marka cabashada la helo, Tri-CAP, waxay eegi doonta cabashada si ay u go'aamiso in xafiiskeenu sharci ahaan awood u leeyahay ama haddii cabashada uu maamuli doono MnDOT OTAT Compliance Coordinator(Isku-Duwaha U Hogaansanaanta MnDOT OTAT) iyo/ama hadii ay maamuli doonto MnDOT Office of Civil Rights Title VI Coordinator(Iskuduwaha Ciwaanka VI ee Xafiiska MnDOT ee Xuquuqda Madaniga). Qofka cabashada gudbiyay wuxuu heli doonaa qoraal u cadeynaya iyada/isaga in cabashadiisa la helay iyo cidda wax ka qabanaysa cabasha.

Tri-CAP iyo/ama MnDOT, waxay haystaan 30 maalmood oo ay ku baaraan cabashada. Haddii macluumaad dheeraad ah loo baahdo si kiiska loo xalliyo, Tri-CAP iyo/ama MnDOT, waxay la xiriiri karaan qofka cabashada gudbiyay. Qofka cabashada gubiyay wuxuu haysataa 15 maalmood oo maalmo shaqo ah laga bilaabo taariikhda ogeysiiska ku qoran si uu ugu diro macluumaadka uu ka soo codsaday qofka baaraha ah ee kiiska loo xilsaaray. Haddii qofka cabashada gudbiyay uusan xiriir la sameyn baaraha kiiska ama baaruhu uusan ku helin macluumaadka dheeraadka ah ee la codsaday 10 maalmood oo maalmo shaqo ah gudahood, Tri-CAP iyo/ama MnDOT waxay u xiri karaan kiiska maamul ahaan. Kiis maamul ahaan waa loo xiri karaa haddii qofka cabashada gudbiyay aanu doonayn inuu sii wado kiiskiisa.

Ka dib markii uu baaruhu dib u eego cabashada, iyada/isaga waxay soo saari doonaan mid ka mid ah labo dukumeenti oo qoraal ah oo ku socda qofka cabashada gudbiyay: warqad kiis xiritaan ah ama warqad helitaan dembi xadgudub(LOF). Warqad xiritaanka ayaa soo koobaysa eedaymaha oo sheegaya in aanu jirin ku xad-gudub Title VI iyo in kiiska la xiri doono. LOF(Warqadda Helitaanka Dembi) waxa ay soo koobaysaa eedaymaha iyo waraysiyada ku saabsan dhacdada lagu eedaynayo, waxayna sharraxaysaa haddii tallaabo anshaxeed, tababar dheeraad ah oo xubin shaqaale ah la siinayo, ama tallaabo kale la sameyn doonto. Haddi uu dacwooduhu rabo inuu rafcaan ka qaato go'aanka, iyada/isaga wuxuu haystaa 15 maalmood ka dib taariikhda warqadda ama LOF inay sidaas sameeyaan.

Qofku waxa kale oo laga yaabaa inuu si toos ah ashtako ugu xareeyo MnDOT, Office of Transit iyo Active Transportation, ATTN: Compliance Coordinator(Iskuduwaha u Hogaansanaanta) ee 395 John Ireland Blvd., MS 430, St. Paul, MN 55155-1899 ama iimayl ugu dir foomka cabashada jean.meyer@state.mn.us. Beddel ahaan, qofku wuxuu si toos ah ugu gudbin karaa ashtako the Federal Transit Administration(Maamulka Gaadiidka Federaalka), ee FTA Office of Civil Rights(Xafiiska FTA ee Xuquuqda Madaniga), 1200 New Jersey Avenue SE, Washington, DC 20590.

Tri-CAP

Title VI Complaint Form (Foomka Cabashada)

Qaybta I:				
Magaca:				
Cinwaanka:				
Taleefanka (Guriga):			Taleefanka (Shaqada):	
Ciwaanka Elektarooniga ah:				
Qaabka dadka cuuryaanka ah xogta lagu siin karo?		Daabacaad Far Waaweyn ah TDD		Cajalad Maqal ah Si Kale
Qaybta II:				
Cabashadaan ma adiga baa naftiisa u xareynaya?			Haa*	Maya
*Haddii aad "haa" ku jawaabtay, aad Qaybta III.				
Haddii kale, fadlan sheeg/keen magaca iyo xiriirka aad la leedahay qofka cabana:				
Fadlan sharax sababta aad ugu xaraysay qof kale/saddexaad:				
Fadlan xaqiiji inaad ogolansho ka heshay dhinaca dhibbanaha ah haddii aad u buuxinayso cabashada qof saddexaad ahaan.			Haa	Maya
Qaybta III:				
Waxaan rumaysanahay in la igu sameeyay takoor ku salaysan (calaamadee dhammaan inta ku khuseysa): <input type="checkbox"/> Jinsi <input type="checkbox"/> Midab <input type="checkbox"/> Asal Qaran Taariikhda uu Dhacay Takoorka La Sheegay (Bisha, Maalinta, Sannadka): Sida ugu cad ee ugu macquulsan u sharax waxa dhacay iyo sababta aad u aaminsantahay in lagu takooray. Sharax dhammaan dadka arinta ku lug lahaa. Ku dar magaca iyo macluumaadka qofka (dadka) ku takooray (haddii la garanayo) iyo sidoo kale magacyada iyo macluumaadka meesha lagala xiriiri karo markaati kasta. Haddii boos dheeraad ah loo baahdo, fadlan isticmaal dhabarka foomkan.				
Qaybta IV				
Horay ma ugu gudbisay cabasho Title VI hay'addan?			Haa	Maya
Qaybta V				

Ma ugu gudbisay cabashadan hay'ado kale oo federaal ah, gobol ah, ama wakaalad maxalli ah, ama maxkamd federaal ama heer gobol ah?

Haa Maya

Haddii ay haa tahay, calaamadee dhammaan inta ku khuseysa:

Wakaalaa Federaal:

Maxkamad Federaal _____ Wakaalad Gobal

Maxkamad Global Wakaalad Deegaan

Fadlan sheeg/bixi macluumaadka ku saabsan qofka laga xiriirinayo wakaaladda/maxkamadda ee meesha cabashada laga soo gudbiyay.

Magaca:

Darajada:

Wakaaladda

Cinwaanka:

Taleefanka:

Qaybta VI

Magaca hay'adda cabashada cabashadu ku wajahan tahay:

Qofka lala xiriirayo:

Darajada:

Lambarka taleefanka:

Waxaad ku soo lifaaqi kartaa wax kasta oo qoraal ah ama macluumaad kale oo aad u malaynayso in ay khuseeyaan cabashadaada.

Sixiixa iyo taariikhda hoos ayaa looga baahan yahay

Sixiix

Taariikh

Fadlan ku keen foomkan shaqsi ahaan ciwaanka hoose, ama boosto ahaan ku soo dir foomkan:

Tri-CAP Title VI Coordinator
1210 23rd Avenue South, PO Box 683
Waite Park, MN 56387